


CONNEX

Adeega gaadiidka safarka oo qiimihiisa la awoodi karo, oo markii loo baahdo ah socdaalka Sartell gudaheeda. Uga kala wareeg basaska ConneX iyo basaska jidka khadka Joogtada ah goobaha basku istaago ee ku yaalla Jidadka Route 21, 22 iyo 31 ee Aagga Adeega ConneX.



ConneX waxay u adeegtaa Dugsiga Sare ee Sartell iyo Xarunta Waxbarashada Carruurnimada Hore ee Oak Ridge inta lagu jiro adeega saacadaha caadiga ah ee maalmaha shaqada. Adeeg iskuulada lagu tegayo oo lagaga imaanayo oo kali ah.

SAACADAHA ADEEGA

ISNIIN-JIMCE 6:30 AM-5 PM

SABTI 10:30 AM-2 PM & 3-6:30 PM

AXADA 10-11 AM & Duhurkii-4 PM

Codsiyada gaadiidku ee la qaatay 15 daqiiqo kahor **BILAABASHADA** adeega ilaa 15 daqiiqo. kahor **DHAMAANKA** adeega.

ConneX waxaa loogu talagalay qof walba. Ma jirto xadidaad da'da ah. Rakaabku waa inay awoodaan inay si madaxbanaan u raacaan ama u keensadaan gargaar.

Wakhtiyada sugitaanku way kala duwan yihiin iyadoo ku salaysan baahida raacitaanka.

Soo wac 320.251.7433 marka aad diyaar tahay: Xulo ConneX.

Sug gaadiidkaaga: Ku sug meel aad ka arki karto baabuurka ConneX marka uu yimaado oo aad awoodo in inaad ku fuusho hal daqiiqo gudaheed marka uu yimaado.

Lacagta bixi marka aad fuulayso: Booqo ridemetrobus.com/fares.

Rakaabka ku bixiya Kaarka Smart Ride waxaa si toos ah loogu shubayaa laba saacadood oo safar bilaash ah.

ridemetrobus.com/connex

conneX ON-DEMAND RIDE SERVICE